

Waxaa cusub corona CORONA

SOMALISKA
NAMBAR 20
NOOFAMBAR 2020

Sharchiyo adag oo lasoo rogay laga bilaabo 10 november Markuu cudurku kusoo kordhayo gobolka

Ha tegin meelaha lagu kulmo. Ka fogow suuqyada iyo dukaamada iyo meelaha dad badani ku kulmaan-kuwani waa sharchiyada adag ee billabanaya 10 november

Cudurkii si deg deg ah ayuu ugu fidayaa wadamo badan. Iswiidhan hay'adda caafimaadka waa ay ka warqabtaa sida cudurku u fidayo iyo meeluhuu ku fidayo.

Hadda gobolka Kalmar dad badan baa cudurkii qaaday, sidaa daraadeed laga bilaabo **10 november waxaa la adkeynayaa sharciga guud**, taasi waxay micnaheedu tahay, dadka deggan gobolku waa inay raacaan sharciga adag ee is dhexgalka.

Laga bilaabo 10-ka bisha Nofeember waxaa lagu boorinayaa dhamaan dadka jooga gobolka Kalmar inay:

Ka fogaaw meelaha laysugu yimaado sida dukaammada, suuqyada waaweyn, matxafyada, meelaha lagu dabaasho iyo meelaha lagu jimicsado. Meelaha lama huraanka ah waa la tegi karaa sida dukaammada cuntada iyo farmishiga.

Ka fogoow ka qeyb gelidda kulammada, riwaayadaha, bandhigyada, tababaradda cayaaraha, cayaaraha iyo tartannada. Taas kuma jiraan tababarrada cayaaraha carruurta 15 jir iyo wixii ka yar ay ka qaybgalayaan.

Haddii ay suuragal tahay: Ka fogow la kulanka fool ka foolka ah dadka aan ahayn kuwa kula nool. Taas macnaheeda waa in lagaaga digaayo abaabulid iyo ka qaybgelida xaflad iyo wixii la mid ah ee dad ku kulmaayo.

Ka fogaanshahaas kuma jiraan la kulanka xarumaha caafimaadka iyo baaritaanka caafimaadka.

Hadda waa muhiim in taxadar dheeraad ah layayimaado. Weliba waxaa la rabaa in qofki calaamadaha covid-19 qabaa uu la kulanka dadka iska ilaaliyo.

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 8 december

”Hadda xaaladdu si'aad ah ayay u kordhaysaa, markaa waa inaan hadda dadaalnaa si'aan uga bad baadno dhibka danbe. Koox koox ha u kulmina. Yareeya kulanka dadka kale si'aad ah. Xaaladu waa khatar hadda , haddii uusan qofka garan hadda ka hor waa in uu hadda fahmaa in xaaladdu ay khatar tahay , sidaa waxaa tidhi Ana Norle'n , oo ah agaasimaha xaaladaha dagdagga ah ee maamulka gobolka Kalmar.

Calaamadaha lagu garto cudurkan karoona (covid-19) Hosta-Qufac

- Qandho-xummad
- Neefsashada oo dhib ah
- Diif
- Sankoo ku xiran
- Cunaha oo ku xanuunaya
- Madax xanuun
- labbo labbo
- Daal
- Murqaha iyo laabatada oo xanuuneysa

Dadka qaarkood calooshaa xanuunta weyna shubmaan kuwa kalena kor kaa wax kasoo baxaan- Waa wax caadi ah iyo urta iyo dha dhanku kaa tago. In badana daal bay dareemaan.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.
Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.

Kalmar kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar